
SOMALI

Euroopan unionin osarahoittama



# Ku soo dhowow xannaanada!




Finland carruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb qaataan waxqabadka xannaanada.

Ujeeddada xannaanadu waa in la hormariyo korriinka, horumarka iyo barashada carruurta iyadoo lala kaashanayo waalidiinta.

Xannaanada ilmuhu...

- helaa saaxiibo oo la ciyaaraa iyaga.
- ka qayb qaataa waxqabadka kala duwan oo wax cusub barta.
- ku tababarta oo ku barta af-Finnishka.
- bannaanka u baxaa maalin kasta.
- seexdaa hurdo maalmeed ama nastaa muddo gaaban.
- cunaa cunto kala duwan oo caafimaad leh (quraac, qado iyo cunto fudud).



- Ilmaha wuxuu bilaabi karaa xannaanada marka uu gaaro sagaal bilood.
- Meel waa in la codsadaa afar bilood ka hor bilaabista.
- Ilmuhu wuxuu booqanayaa xanaanada isagoo la socda waalidiinta ka hor maalinta ugu horreysa ee xanaanada.

- Waa muhiim in ilmuhu si joogto ah u tago xannaanada.
- Waqtiga imaatinka iyo bixitaanku waa wanaagsan yahay inuu maalin kasta isku mid ahaado.
- Maalmaha fasaxa ilmaha waa in horay loola sii heshiiyo shaqaalaha xannaanada.
- Waxqabadka xannaanadu waa lacag. Haddii dakhliga qoyska yar yahay, wax lacag ah lama qaado.

Tampereen ammattikorkeakoulu
TAMPERE
Pirkanmaan hyvinvointialue
Niitty2

Sawirrada: canva.com